Hagista ku saabsan foomka oggolaanshaha ee HFEA

Foomamka oggolaanshaha ee Masuuliyiinta Bacraminta iyo Baarista uurjiifka ee Insaanka (Human Fertilisation and Embryology Authority) (HFEA) waxaa loogu talagalay in ay isticmaalaan tabarruceyaasha unugyada, bukaanleyda iyo lammaaneyaashooda marka ay yimaaddaan xarumaha shati leh ee HFEA si loo diiwaangeliyo oggolaanshaha qaybo kaladuwan oo ka mid ah daawaynta bacrinsanaanta. Waxaa dukumeentigan ku jirta hagis asal ah oo ku saabsan foomamka oggolaanshaha ee HFEA.

Oggolaanshaha daawaynta, kaydinta iyo/ama tabarruca

Sharciga ku saabsan Bacraminta iyo Baarista uurjiifka ee Insaanka (HFE) ee 1990kii soo baxay (Human Fertilisation and Embryology (HFE) Act 1990) (ee wax laga beddelay) waxuu xarumaha shati leh ka rabaa in oggolaanshe laga war hayo oo qoran ay ka soo helaan qofka ka hor inta aanay kaydin ama isticmaalin ukunnada, shahwadda ama uurjiifka qofkaas. Waa in qofka la siiyo:

- warbixin ku filan si uu u fahmi karo nooca, ujeeddada iyo natiijooyinka ka iman kara daawayntiisa ama tabarruca uu samaynayo
- fursad habboon oo uu ku helo caqlicelin hagaagsan oo ku saabsan natiijooyinka ka iman kara tallaabooyinka uu qofkaasi ku talajiro in uu qaado, iyo
- warbixin ku saabsan nidaamka lagu beddeli karo ama loogu soo ceshan karo wixii oggolaansho ah ee la bixiyey, iyo natiijooyinka taas ka iman kara.

Masuuliyiinta HFEA waxay xarumaha ugu deeqaan foomamka oggolaanshaha ee soo socda, si ay oggolaanshaha dadka uga helaan:

Daawaynta

MT	Oggolaanshahaaga si loo isticmaalo shahwaddaada iyo uurjiifkaaga marka la daaweynayo lammaanahaaga iyo kaydinta uurjiifkaaga
WT	Oggolaanshahaaga si loo isticmaalo ukunnadaada iyo uurjiifkaaga marka lagu daaweynayo iyo kaydinta uurjiifkaaga
MGI	Oggolaanshahaaga si shahwaddaada loogu isticmaalo rimaygacmeedka
WGI	Oggolaanshahaaga si ukunnadaada loogu isticmaalo nidaamka wareejinta unugyada ee GIFT

Kaydinta

GS	Oggolaanshahaaga in la kaydiyo ukunnadaada ama shahwaddaada
LGS	Oggolaanshahaaga in la kordhiyo kaydinta ukunnadaada ama shahwaddaada
ES	Oggolaanshahaaga in la kordhiyo kaydinta uurjiifkaaga

Tabarruca

MD	Oggolaanshahaaga isticmaalka iyo kaydinta shahwadda aad ku tabarrucdo
WD	Oggolaanshahaga isticmaalka iyo kaydinta ukunnada aad ku tabarrucdo
ED	Oggolaanshahaaga isticmaalka iyo kaydinta uurjiifka aad ku tabarrucdo

Nidaamka hooyo-warshadeed

MSG	Oggolaanshahaaga in shahwaddaada ama uurjiifkaaga loo isticmaalo loona kaydiyo nidaamka hooyo-warshadeed
WSG	Oggolaanshahaaga in ukunnaddaada ama uurjiifkaaga loo isticmaalo loona kaydiyo nidaamka hooyo-warshadeed

Ka noqoshada

WC Ka noqoshada oggolaanshahaaga ama sheegidda in aadan oggolayn

Oggolaanshaha sheegidda macluumaadka

Sharciga HFE ee 1990kii soo baxay (ee wax laga beddelay) waxuu dhigayaa macluumaadka dadka ay ka hayaan kiliniigyada ama HFEA ee lagu garan karo kuwaasoo la xiriira daawayntooda, kaydinta iyo tabarruca ay ku bixiyaan unugyadooda qaangaar ah ee jinsiyeed iyo uurjiifkooda, ama kuwa lammaaneyaashooda, in aanan loo sheegin dad kale (sida cilmibaare ama Takhtarka Guud (GP) ee bukaanlaha) iyagoon dadkaasi oggolaan, marka laga reebo xaalad degdeg ah oo soo gaarta caafimaadkooda. Foomka soo socda ayaa kiliniigyada u suurtogelinaya in ay oggolaanshahaas soo helaan:

CD Oggolaanshahaaga sheegidda macluumaadka dadka lagu garan karo

Ujeeddooyinka daawaynta

Qaybta 3aad ee foomka CD waxay ku saabsan tahay sheegidda macluumaadka ee ay kiliniigyadu samayn karaan. Waxuu bukaanluhu oggolaan karaa in kiliniigyadu ay sheegaan macluumaadka dadka lagu garan karo ee ku saabsan daawayntiisa, kaydinta ama tabarruca uu ku bixiyo unugyadiisa qaangaar ah ee jinsiyeed iyo/ama uurjiifkiisa, ama kuwa lammaanihiisa. Waxaa macluumaadkaas loo sheegi karaa Takhtarka Guud ee qofkaas, xirfadleyaasha kale ee daryeelka caafimaadka (si ay u bixiyaan daryeelka caafimaadka ee ugu fiican sida suurogal ah) iyo/ama xisaab hubiyeyaasha iyo shaqaalaha hawlaha maamulka (si ay u fuliyaan hawlaha iyaga loo xilsaaray ee la xiriira shaqada xarunta shati loo siiyey).

Ujeeddooyinka cilmibaarista

Qaybta 4aad waxay ku saabsan tahay macluumaadka lagu hayo diiwaanka HFEA. Bukaanluhu waxuu oggolaan karaa in masuuliyiinta HFEA ay sheegaan macluumaadka dadka lagu garan karo ee ku saabsan daawayntiisa, kaydinta unugyadiisa qaangaar ah ee jinsiyeed iyo/ama uurjiifkiisa, ama kuwa lammaanihiisa.

Ujeeddada oggolaanshahaasi waxay tahay in cilmibaareyaasha loo suurtogeliyo in ay isticmaalaan macluumaadka ku saabsan daawaynta ama kaydinta dadka si ay u baaraan badbaadada iyo waxtarka noocyada daawaynta ee bacrinsanaanta.

Marka ay suurogal tahay, macluumaadka magac la' oo keliya ayaa cilmibaarista loo adeegsan doonaa, laakiin mararka qaar waxay cilmibaareyaashu u baahan yihiin in ay isticmaalaan macluumaadka dadka lagu garan karo (sida magaca ama taariikhda dhalashada) si ay isugu xiriiriyaan laba qaybood ee macluumaad oo kaladuwan (tusaale ahaan diiwaanka HFEA ee ku saabsan bacramin-dibadeedka IVF iyo diiwaan guud ee kansar). Waxay taasi cilmibaareyaasha u suurtogelin doontaa in ay baaraan sifooyinka lagu arko caafimaadka bukaanleyda bacramin-dibadeedka IVF. Taas maxaa dheer, waxay suurtogelin doontaa in cilmibaaris lagu sameeyo natiijooyinka u soo baxa carruurta bacramin-dibadeedka IVF ama arrimaha raad ku yeelan kara haddii bacramin-dibadeedka IVF uu shaqeeyo iyo haddii kale (tusaale ahaan haddii joojinta sigaarku ay saamayn ku yeelato sicirrada guusha laga gaaro bacramin-dibadeedka IVF).

Macluumaadka ku jira diiwaanka HFEA waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan bukaanleyda, daawayntooda iyo natiijooyinka daawayntaas. Mar kastoo cilmibaareyaashu ay isticmaalaan macluumaad shakhsi ahaaneed waxay sidaas ku sameeyaan iyagoo ay qabanayaan xeerar adag oo lagu hubiyo in la ilaaliyo wixii macluumaad ah ee ay hayaan ama ay isticmaalaan. Marka cilmibaareyaashu ay soo saaraan natiijooyinka ka soo baxay cilmibaaristooda, waxay hubiyaan in aanan la garan karin qof macluumaadkiisa loo isticmaalay cilmibaarista.

Tabarruceyaasha iyo dadka lagu daawaynayo unugyada qaangaarka ah ee jinsiyeed ama uurjiifka tabarruc lagu bixiyey lama weydiinayo in ay oggolaanshe ka bixiyaan cilmibaarista. Waxaa marwalba la bixin doonaa macluumaadka aan magac lahayn ee ku saabsan daawaynta loo isticmaalo unugyada qaangaar ah ama uurjiifka la bixiyey.

Tan iyo 1dii May 2010, waxaa waajib ah in qof kastoo daawayn la siinayo uu buuxiyo foomka CD (haddii uusan hore u samaynin) iyadoon la eegayn markii ugu horraysay ee uu kiliniigga isku qoray si uu daawayn uga helo.

Oggolaanshaha waalidnimada

Marka daawaynta bacrinsanaanta loo adeegsado shahwad tabarruc lagu bixiyey, uurjiif lagu abuuray shahwadda tabarrucaha ama uurjiifka tabarrucaha, Sharciga HFE ee 2008dii soo baxay (HFE Act 2008) ayaa xarumaha shati leh ka raba in ay oggolaanshe laga war hayo oo qoran u soo helaan waalidnimada sharciyeed. Waxaa loo baahan yahay oggolaansheyaal kaladuwan taasoo ku xiran haddii bukaanluhu uu guur yahay/leeyahay lammaane sharciyeed ama uusan guur ahayn/lahayn lammaane sharciyeed. Si aad u hesho warbixin taas ku saabsan fadlan fiiri www.hfea.gov.uk

Masuuliyiinta HFEA waxay xarumaha ugu deeqaan foomamka oggolaanshaha ee soo socda si bukaanleyda iyo lammaaneyaashoodu ay u bixin karaan oggolaanshaha habboon ee ku saabsan waalidnimada:

PP Oggolaanshahaaga in la noqdo waalidka sharciyeed
WP Oggolaanshahaaga in lammaanahaagu uu noqdo waalidka sharciyeed
WC Ka noqoshada oggolaanshahaaga ama sheegidda in aadan oggolayn

Ka noqoshada iyo beddelidda oggolaanshaha

Qofku waxuu beddeli karaa ama ka noqon karaa oggolaanshihiisa ilaa inta ukunnada, shahwadda ama uurjiifka la isticmaalayo. Ukunnada, shahwadda iyo uurjiifka waxaa loo arkaa in la isticmaalay marka iyaga:

- lagu wareejiyo haweeney
- loo isticmaalo mashruuc cilmibaaris (oo loo arko in ay hayaan cilmibaareyaashu oo loo soo saaray si cilmibaaris loogu adeegsado)
- loo isticmaalo tababbar (oo loo arko in ay hayaan dadka tababbarka wada), ama
- loo suurtogeliyo in ay xumaadaan.

Waxaa oggolaanshaha lagula noqon karaa marka la buuxiyo foomka WC, ama si kale loogu bixiyo ogaysiin qoran.

Marka qof uu wax ka beddelo oggolaanshihiisa waxaa fiican in foom cusub oo oggolaansho la buuxiyo. Tusaale ahaan, haddii bukaanle laga kaydiyey shahwad uu isticmaalo foomka WC si uu uga noqdo oggolaanshaha isticmaalka shahwaddiisa ka dib marka uu dhinto, waa in markaa la buuxiyo foom MT oo cusub.

Isbeddelka xaaladda

Bukaanleyda iyo tabarruceyaashu waa in ay xarunta ka wargeliyaan isbeddellada ku yimaadda macluumaadkooda, tusaale ahaan isbeddelka cinwaanka ama isbeddelka lammaanaha. Bukaanleyda iyo tabarruceyaashu waa in ay weliba ka fikiraan waxa ay rabaan in lagu sameeyo ukunnadooda, shahwaddooda ama uurjiifkooda haddii ay dhintaan ama ay beelaan kartida maskaxda.

Waxaa foomamka oggolaanshaha lagu oggolaan karaa kaydinta ama isticmaalka ukunnada, shahwadda ama uurjiifka ka dib marka uu qofku dhinto ama beelo kartida maskaxda. Haddii aanan oggolaanshe la bixinin markaa ukunnada, shahwadda ama uurjiifka waxaa loo suurtogelin doonaa in ay xumaadaan.

Caqlicelinta iyo warbixinta

Ka hor inta aanan la buuxinin foom oggolaansho, qofka oggolaanshaha bixinaya waa in fursad habboon loo siiyo in uu helo caqlicelin hagaagsan oo ku saabsan natiijooyinka ka iman kara tallaabooyinka loo soo bandhigayo waana in loogu deeqo dhammaan warbixinta habboon sida ku qayaxan Xeerka Habdhaqanka (Code of Practice) ee HFEA. Waxay xarumuhu tixraaci karaan Xeerka Habdhaqanka halkaasoo shardigaas lagu sharxayo.

Xaddididda oggolaanshaha

Qofku waxuu xaddidi karaa oggolaanshihiisa kaydinta ama isticmaalka ukunnadiisa, shahwaddiisa ama uurjiifkiisa. Tusaale ahaan, tabarrucuhu waxuu sheegi karaa in waxa uu ku tabarruco loo isticmaali karo uun si loogu daaweeyo qof uu yaqaanno. Waxaa xaddididda lagu sheegi karaa foom oggolaansho ama warqad gaar ah oo la saxiixay, taariikhda lagu dhigay lana raaciyey foomkan.

Tabarruca

Si ay ugu tabarrucaan ukunno, shahwad ama uurjiif lagu daaweeyo qof kale, loo adeegsado cilmibaaris ama loo adeegsado tababbar, waxay tabarruceyaashu u baahan yihiin in ay buuxiyaan shuruudo gaar ah si loo hubiyo in ay ku habboon yihiin (tusaale ahaan shuruudo la xiriira da'da iyo baaritaanno lagu sameeyo caafimaadkooda).

Tabarruca loogu talagalay daawaynta – Tabarruca lagu bixiyo ukunno, shahwad iyo uurjiif lagu daaweeyo qof kale waxay dadka aanan si kale u awoodayn fursad u siinaysaa in ay carruur dhalaan. Ka hor inta aanan hawsha la bilaabin, waa in xaruntu ay tabarruceyaasha siiso warbixin ku saabsan shuruudaha baarista tabarrucaha iyo arrimaha sharciyeed ee la xiriira waalidnimada iyo tabarruca. Si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan tabarruca loogu talagalay daawaynta fiiri www.hfea.gov.uk

Tabarruca loogu talagalay cilmibaarista iyo tababbarka – Tabarruca lagu biixyo ukunno, shahwad iyo uurjiif loo adeegsado ujeeddooyinka cilmibaarista iyo tababbarku waxay suurtogelinaysaa in cilmibaaris la sameeyo (matalan kordhinta aqoonta laga leeyahay cudur daran iyo daawayntiisa), iyo in dadka laga tababbaro sida qayb looga soo qaado uurjiifka, kaydinta uurjiifka ama farsamooyin kaloo la xiriira uurjiifka. Ka hor inta aanay tabarruceyaashu taas oggolaan, waa in xaruntu ay iyaga ugu deeqdo warbixin ku saabsan mashruuca cilmibaarista ee gaarka ah ama tababbarka gaarka ah iyo ujeedooyinkooda. Si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan tabarruca loogu talagalay cilmibaarista iyo tababbarka fiiri www.hfea.gov.uk

Oggolaanshaha in tababbarka loo adeegsado unugyada qaangaar ah iyo uurjiifka

Marka qof uu rabo in ukunnadiisa, shahwaddiisa ama uurjiifkiisa loo adeegsado ujeeddooyinka tababbarka waa in uu taas qoraal ku oggolaado. Waxaa fursaddaas badi la tixgeliyaa marka ukunnada, shahwadda ama uurjiifku ay ka badtaan inta loogu baahan yahay si bukaanle loo daaweeyo, inkastoo shahwadda weliba loo soo qaadi karo ujeeddooyinka tababbarka oo keliya.

Waxaa bogga internetka ee HFEA laga heli karaa liiska waxqabadyada tababbarka ah ee loo adeegsan karo uurjiifka. Ujeeddooyinka tababbarka ee loo adeegsan karo unugyada qaangaar ah way kaladuwanaan karaan taasoo ku xiran baahiyaha kiliniig kaste.

Haddii ay rabaan, warbixin dheeraad ah oo taas ku saabsan ayay bukaanleydu ka heli karaan kilniiggooda ka hor inta aanay oggolaanshaha bixin.

Warbixinta kiliniigga

Shaqaalaha kiliniigga ee oggolaanshaha qofka ka qaadaya waxaa looga baahan yahay in lambarka bukaanlaha ama tabarrucaha ay ku dhigaan dhanka hoose ee bog kaste oo ka mid ah foomka oggolaanshaha. Haddii bogaggu ay kala lumaan waxay taasi fududayn doontaa in la soo ogaado bogagga wada socda. Hase yeeshee, waxay iyagu ikhiyaar u leeyihiin in ay ku dhigaan lambarka tixraaca ee xarunta HFEA, foomamka kale ee habboon iyo muddada ay kaydinayaan unugyada qaangaar ah ama uurjiifka.

Isku-xireyaasha waxtar leh

Masuuliyiinta Bacraminta iyo Baarista uurjiifka ee Insaanka (Human Fertilisation and Embryology Authority) – www.hfea.gov.uk

Ururka Caqlicelinta ku saabsan Bacrinsanaanta ee Ingiriiska (British Infertility Counselling Association) – www.bica.net

Ururka Ma dhalaysnimada ee Ingiriiska (Infertility Network UK) – www.infertilitynetworkuk.com

Ururka Qaran ee Tabarruca lagu bixiyo Unugyada qaangaar ah (National Gamete Donation Trust) – www.ngdt.co.uk

Ururka Dhalmada lagu helo Tabarrucaha (Donor Conception Network) – www.dcnetwork.org

Qaamuus-yare

Counselling – Caqlicelinta
Waxay ujeeddadeedu tahay in bukaanleyda ama tabarruceyaasha iyo lammaaneyaashooda loo suurtogeliyo in ay fahmaan natiijooyinka ka iman kara daawaynta ma dhalaysnimada, in la bixiyo taageero shucuureed iyo in iyaga laga caawiyo in ay ka gudbaan dhibaatooyinka ka iman kara daawaynta.

Donation – Tabarruca
Ereyga 'tabarruca' waxuu khuseeyaa ku deeqidda shahwadda, ukunnada ama uurjiifka si loogu isticmaalo daawaynta bacrinsanaanta, cilmibaarista ama tababbarka.

Donor Insemination (DI) – Rimaygacmeedka Tabarrucaha
Shahwadda tabarrucaha oo lagu shubo siilka, afka ilmagaleenka ama ilmagaleenka laftigiisa.

Egg sharing – Wadaagga ukunnada
Heshiis dhaca marka haweeney rabta daawaynta bacramin-dibadeedka IVF ay qaadato hal wareeg oo daawaynta ka mid ah kaasoo lagaga soo qaado ukunnadeeda. Waxay markaa isticmaashaa ukunnadaas qaybtood si iyada loogu daaweeyo waxayna ukunnada kale tabarruc u siisaa haweeney kale. Haweeneyda iyadu tabarruc ku bixinaysa ukunnadeeda ayaa laga yaabaa in ay hesho faa'iidooyin ay ka mid tahay kharashka daawaynteeda oo laga yareeyo.

Embryo – Uurjiifka
Ukun la bacramiyey oo suurogal ah in uu uurkujir noqdo.

Embryo freezing – Barafaynta uurjiifka
Uurjiifka aanan loogu baahnayn daawaynta ka mid ah wareegga lagu jiro waa la barafayn karaa waxaana loo kaydin karaa si mustaqbalka loo isticmaalo. Barafaynta waxaa weliba loo yaqaannaa dhowrista barafka ee unugyada (cryopreservation).

Embryo storage – Kaydinta uurjiifka
Kaydinta mid ama dhowr ka mid ah uurjiifka si mustaqbalka loo isticmaalo iyagoo la barafeeyo.

Embryo transfer – Wareejinta uurjiifka
Uurjiifka oo dib loo geliyo bukaanleyda dheddig ah.

Gametes – Unugyada qaangaar ah ee jinsiyeed
Shahwadda labka ama ukunta dheddigga ee isku dhegi kara si ay u noqdaan unugga qaangaar ah ee dheddigga (zygote).

Gamete Intra Fallopian Transfer (GIFT) – Wareejinta Unugyada qaangaar ah ee jinsiyeed oo la Mariyo Tuubooyinka ukunnadu maraan
Hawl ka kooban ukunnada oo haweeney laga soo qaado, lagu qaso shahwad islamarkaana dib loo geliyo mid ka mid ah labada tuubooyin ee ukunnadu ay maraan ee haweeneyda si ay ugu bacrimaan jirka gudihiisa (in vivo).

Identifying information / Non-identifying information – Macluumaadka dadka lagu garan karo / Macluumaadka aanan dadka lagu garan karin
Macluumaadka dadka lagu garan karo waa macluumaadka suurtogelinaya in la garto shakhsigu cidda uu yahay, ama keeni kara in qofkaas la soo garto (tusaale ahaan, magaca ama taariikhda dhalashada).

Macluumaadka aanan dadka lagu garan karin waa macluumaadka shakhsi ku saabsan ee aanan keeni karin in la soo ogaado cidda uu qofkaasi yahay (tusaale ahaan, midabka timaha ama jinsiyadda).

Insemination – RImaygacmeedka
Shahwadda oo mareenka dhalmada ee dheddigga lagu geliyo farsamo gacmeed. Waxaa sidaas lagu samayn karaa shahwad islamarkaa la soo daayey ama shahwad baraf lagu soo hayey.

Intra Uterine Insemination (IUI) – Rimaygacmeedka lagu Dhexdhigo Ilmagaleenka
Rimaygacmeed shahwadda lagu geliyo ilmagaleenka haweeney.

In vitro – Dibadeed
Lagu sameeyo jirka dibaddiisa (matalan shaybaar dhexdiis).

In Vitro Fertilisation (IVF) – Bacramin-dibadeedka
Marka ukunnada iyo shahwadda la soo qaado ee la isugu qaso shaybaar dhexdiis si bacraminta loogu sameeyo jirka dibaddiisa. Uurjiifka abuurma ayaa ka dib lagu wareejin karaa bukaanleyda dheddig ah.

In vivo – Dhexeed
Lagu sameeyo jirka dhexdiisa.

Surrogacy – Nidaamka hooyo-warshadeed
Hawsha haweeney ilme u sidda qof kale. Nidaamka hooyo-warshadeed ee buuxa waxuu ka kooban yahay haweeneyda oo la geliyo uurjiif lagu abuuray ukunnada iyo shahwadda waalidka ilmaha raba, ukun tabarruc lagu bixiyey oo lagu bacramiyey shahwadda aabbaha ilmaha raba ama uurjiif lagu abuuray ukunno iyo shahwad tabarruc lagu bixiyey.

Nidaamka hooyo-warshadeed ee qayb ah waxuu ka kooban yahay shahwad laga soo qaaday aabbaha ilmaha raba iyo ukun ka timid hooyada warshadeed.

Zygote – Unugga qaangaar ah ee dheddigga
Unugga ku abuurma bacraminta awgeed.